

WARBIXIN: GUDDIGA GURMADKA ABAARAH A SOOMAALIYA...

MUUSE MAXAMUUD JISOW | somali39@hotmail.com

Gudiga Abaaraha Koonfurta Soomaaliya ayaa soo Bandhigay
Sidii ay wax u soo galeen iyo siday uga baxeen
War saxaafadeed lasoo gaarsiiyey xafiiska wararka ee shabakada
www.somalitalk.com, ee magaalada muqdisho oo ay soo gaadhsiiyey
gudoomiyaha gudiga abaaraha soomaaliyeed sheekh axmed maxamed
salaymaan ayaa waxuu kaga waramayaa intii ay gudigu dhisnaayeen oo
ahayed laba bilood waxqabadkii ay u qabteen gobolada koonfureed ee
abaaruhu aafeeyeen iyo hantida soo gaartay waxaana warsaxaafadeekan ku
saxiixnaa gudoomiyaha gudiga abaaraha sheekh axmed maxamed
sulaymaan waxuuna u dhacay sidan.

**SOMALI RELIEF COMMITTEE
FOR DROUGHT VICTIMS**



لجنة الإغاثة الصومالية
لمتضرري الجفاف

GUDDIGA GURMADKA ABAARAH A SOOMAALIYA

Tel: 658565/253638/920202: Mobile: 577471/524621/286606

Email: kaalmeeye@hotmail.com

Ref: G.G.A.S / 28 / 06

Date: 29/03/2006 Somaliya

Ku: Dhammaan Xubnaha G.G.A.Soomaaliya

UJEEDO: Warbixin Ku Saabsan Howlaha Gudiga

Gudiga gurmada abaaraha mudadii uu dhisnaa waxaa u suurto galay howlo badan oo muhiim ah kuwaas oo lagu daryeelayey bulshada tabaaleysan ee ay abaaruhu ku dhaceen waxaana si gaar ah loo xusi karaa qodobada hoos ku qoran ‘

ka dib markii la magacaabay gudigu wuxuu diyaariyey xafiiska laga maamuli lahaa howlaha ,wuxuuna isla markiiba abaabulay bulshada soomaaliyeed wuxuuna ku guuleystay in ay usoo xaroodaan deeqo kala duwan oo kooban lacag, raashin,iyo dhar

DAKHLIGA IYO QARASHKA LACAGAHA

LACAGAHA SOO GALAY	Us \$ 232,978.85	SH.SOM	77,234,000
LACAGAHA BAXAY	Us \$ 187,404.00	SH.SOM	91,062,000
LACAGAHA YAALA	Us \$ 45,574.85	SH.SOM	-13,828,000

Lacagaha dakhliga ah ee soo galay gudiga waxey ka kala yimaadeen ganacsatada Gobolka banaadir , Gobolada Puntland, jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dibadda, hay'adaha kheyriga islaamiga ah, dalladaha waxbarashada, Ururada Bulshada Soomaaliyeed, Masaajidayada, xaafadah iyo Suuqyada Muqdisho iyo Shaqsiyaad Muslimiin ah oo ku klala nool dalka gudahiisa iyo dibadiisaba.

Raashinka sida tooska ah u soo gaaray Gacanta Gudiga
Waxa uu ka yimid .

iskoolka madiino warsame

Bariis	200	loor
Saliid	100	Ctn
Timir	170	==
Qamadi	200	loor

Xaafadaha Magaalada

Bariis	200	Loor
Bur	10	==
Galey	10	==
Sokor	25	==
Timir	60	Kiish

Hey'adda Manhal Al-Kheyriyah

Timr	70	Tn
------	----	----

Hey'adda Alxuneyn Al-Kheyriya

Timr	30	Tn
------	----	----

Dhamaan Raashimaha Tooska Usoo Galay gacanta Gudiga waxaa lala qeybiyey raashimihii la iibiyey marka laga reebo

100 Loor oo bariis ah, 20 loor oo sokor ah iyo 70 kiish oo timir ah oo weli sii yaala bakhaarka, dhawaana la doonaayo in loo gubbiyo meelaha dhibaataadu ka jirto.

Qorshaha mustaqbalak dhow ee gudiga

Gudiga waxaa u qorsheysan in uu mustaqbalka dhow bilaabo xamlad ururin tabarucaad isla markaana wixii soo baxa iyo wixii yaala si deg deg ah u gaarsiiyi meelaha dhibaataadu ka jirto.

sidoo kale waxaa u qorsheysan in uu dhowr goobood oo baahi darani ka jirto kijimo quudin ah ka furuo.

Booyadaha biyo dhaaminta

Gudigu waxaa gacantiisa ku jira 16 Booyadood oo biyo dhaamis ah kuwaas oo 7 ka mid ah ay bixiyeen ganacsatada gobolka banaadir Waxaase Shidaalkooda iyo dayactirkooda bixiya Gudiga Gurmada Abaaraha.

8 kamid ah booyadaha waxaa kireeyey gudiga , hal ka mid ahna waxaa ku deeqay jamciyada Manhal-Akheyriyah waxeyna kala joogaan booyadahaasi goobaha hoos ku qoran.

Gobolka	Gedo	7	booyadood
=====	Bay	4	=====
=====	Sh/Hoose	3	=====
=====	Bakool	1	=====
=====	J/Dhexe	1	=====

FG:

4 Ka mid ah Booyadihii Ganacsatada Waxey dib ugu soo laabteen muqdisho waxaana lagama maarmaan ah in kaalintoodii dib loo buuxiyo, waxaana kaloo jira gobo uu ka jiro oon aad u daran, sida maalo ka mid ah G/bay, bakool iyo sh/hoose.

**Gudoomiyaha G/G/A/Soomaaliya
Sh/ Axmad Maxamad Suleyman**